| Qaybah a 1 iyo 2 | # Hagaha Kaqaybqaataha<br><br>## Hagaha Korriinka Habdhaqanka ee Habboon |
| --- | --- |
| Koorsadaanu waxay ku aadantahay Hagaha Korriinka iyo Waxbarashada/Habdhaqanka Carruurta ee 4ta saacadood ah<br>shuruudaha tababarka ee daryeel bixiyaasha carruurta Qoyska.<br><br>**La Cusboonaysiiyay 4/2025** | **4 Saacad ood** |

**Xuquuqda lahaanshaha iyo Xadidnaanta Isticmaalka iyo Mas'uuliyadaha Ka Dhalanaya**

Manhajkaan waxaa lagu diyaariyay maalgalin ay bixisay Waaxda Carruurta, Dhalinyarada iyo Qoyska ee Minnesota. Waaxda Carruurta, Dhalinyarada iyo Qoyska ee Minnesota wax wakiil ah kama ahan wax mas'uuliyad ahna kama saarna isticmaalkiisa ama natiijadiisa. Manhajkaan waxaa laga yaabaa inaan dib loo soo saarin, lama koobin karo, lama iibin karo ama si kale looma qaybin karo ayada oo aan oggolaansho qoraal ah laga haysan Waaxda Carruurta, Dhalinyarada, iyo Qoyska ee Minnesota.

Si aad u codsato oggolaansho qoraal ah oo ku saabsan isticmaalka ama dib usoo saarista qayb kamid ah manhajkaan, iimayl u dir DCYF.Child.Care@state.mn.us.

# Guudmarka Qaybta 1aad

**Knowledge and Competency Framework (KCF, Qaab-dhismeedka Aqoonta iyo Kartida) ee Minnesota ee Aagga Mowduuca Xirfadlayaasha Carruurnimada Hore, Aagga Maadada Child Development Associate (CDA, Isku Xirka Horumarinta Carruurta)**

Qaab-dhismeedka Aqoonta iyo Kartida (KCF) ee Minnesota ee Aagaga Mowduuca Xirfadlayaasha Carruurnimada Hore iyo Aagaga Maadada Isku Xirka Horumarinta Carruurta (CDA) waxay halkan ugu qoran yihiin si ay uga caawiyaan ka qaybgalayaasha inay fahmaan kartida, nuxurka, iyo maadooyinka looga hadlayo tababarka.

- Qaybta Nuxurka KCF: I. Korriinka iyo Waxbarashada Carruurta
- Aagga Maadada CDA: VIII. Mabaadii'da korriinka iyo waxbarashada carruurta

**Ujeedooyinka Waxbarashada:**
Inta tababarkaanu socdo, ka qaybqaateyaashu waxay:
- Baro mabaadii'da muhiimka u ah korriinka maskaxda ee xiliga hore.
- Baar saameynta dhaqanka iyo xiriirka daryeelbixiyuhu ku leeyihiin barbaarinta korriinka shucuurta iyo bulshada ee carruurta.

**Ujeedooyinka Waxbarashada** waa in dib loogu eegaa billoowga kulan kasta oo lagu dadaalo in la isku xiro nuxurka iyo jawaabaha ka qaybqaataha dib loogu noqdo ujeedooyinka kulanka.

## Guudmarka Qaybta 1aad

| | Wakhtiga Qaybta | Fikradaha Muhiimka Ah | Xeeladaha Waxbaridda |
|---|---|---|---|
| **A** | 15 daqiiqo | Soo Dhawaynta/Hordhacyada<br>Dib-u-eegista ujeedooyinka | Qiimeynta Hantida Baahida Kooxda<br>Milicsiga shakhsi ahaaneed<br>Dooda Kooxda Ballaaran |
| **B** | 30 daqiiqo | Mabaadii'da Muhiimka u ah Korriinka Maskaxda ee xiliga hore | Hal Abuurka Kooxda Ballaaran<br>Lammaanin iyo Wax wadaagis |
| Lammaanin iyo Wax | 30 daqiiqo | Qeexista Taageerista Koritaanka Shucuurta iyo Bulshada | Milicsiga shakhsi ahaaneed |

| | | | |
|---|---|---|---|
| wadaagis | | | Hawsha Koox Yar<br>Dooda Kooxda Ballaaran |
| **D** | 30 daqiiqo | Kaalinta Xiriirku ku leeyahay Korriinka Shucuurta iyo Bulshada | Dooda Kooxda Ballaaran<br>Hawsha Koox Yar |
| **E** | 15 daqiiqo | Dib-u-eegista Ujeedooyinka/Soo Xirista | Milicsiga shakhsi ahaaneed<br>Wadaagga Kooxda Ballaaran |
| | Wadarta Guud ee Wakhtiga: 2 saacadood | | |

## Korriinka Maskaxda ee Xiliga hore

*Falgal kasta oo uu la sameeyo daryeel bixiyaha wuxuu u gudbayaa maskaxda carruurta. Xiriirka barbaarinta iyo taageerada leh ee xiliga hore waxay xoojinayaan inay dareemaan ammaan iyo nabadgalyo waxayna ka caawiyaan inay wax bartaan, koraan, ayna dhistaan xiriirada kala dhexeeya dadka kale.*

**Liiska Waaya-aragnimada Wanaagsan**
Abuur liiska waaya-aragnimada wanaagsan ee xiliga hore iyo isla macaamilka taageeraya korriinka maskaxda ilmaha.

- 
- 
- 
- 
- 

## Korriinka Shucuurta iyo Bulshada

*"Korriinka dhanka bulshada iyo shucuurta waxaa loola jeedaa awoodda koritaanka ee canugga laga bilaabo markuu dhasho ilaa shan sanno jir si uu u samaysto xiriirada dhow ee carruurta ay isku da'da yihiin iyo dadka waaweyn; waaya-aragnimada, maamulista, iyo inuu shucuurta u muujiyo qaabab*

*dhaqan ahaan ku habboon, iyo barashada bii'ada iyo waxbarashada, dhamaantood marka loo eego qoys ahaan, bulsho ahaan, iyo dhaqan ahaan (CSEFEL).”*

**Maxay ku baranayaan korriinka shucuurta iyo bulshada?**

- 6-bilood jir:
- 18-bilood-sannad-jir:
- 2 iyo 3 sano jir:
- 4 sano jir:
- Carruurta Gaartay Da'da Dugsiga:

## Waaya-aragnimada Xun ee Xiliga caruurnimada

*Waaya-aragnimada xun ee xiliga caruurnimada, ama ACE, waa dhacdooyinka uur-kuytaalada leh ee dhaca xiliga caruurnimada kahor da'da 18 sanno waxayna saameyn waarta ku yeelan karaan caafimaadka, badqabka, iyo korriinka. Ereyga “ACEs” waxaa loola jeedaa 10 nooc oo kala duwan oo dhibaatooyin ah oo saddex qaab oo kala duwan ah:*

- *Xadgudubka Jirka, Shucuurta, iyo Galmada*
- *Dayacaada Jirka iyo Shucuurta*
- *Caqabadaha qoyska waxay noqon karaan xubin qoyska ah oo wajahaysa xanuun maskaxda ah, qalbijab, dabeecadaha ku fakarista isdilka, isticmaalka maanndooriyaha, xabis galista, xadgudubka lamaanaha galmada ama xadgudubka qoyska, ama kala taga waalidka ama furiinka.*

*Caruurtu waxay sidoo kale la noolaan karaan welwelka dhibta badan ee waara ee aan la saadaalin karin kaasoo ka dhasha dhacdooyinka la xiriira bii'ada sida geerida xubin qoyska kamid ah, dhibaataynta, xadgudubka bulshada dhexdeeda ah, musiibooyinka dabiiciga ah, waaya-aragnimada qaxootida ama xiliga dagaalka, goobjoogista ama wajahidda cunsuriyad, argagaxisonimo, hoy la'aan, ama la noolaanshaha faqriga.*

**Xiriirada taageerada ee leh taageerada xiriirka PCEs**

Markii waaya-aragnimada caruurtu wanaagsanaanto caruurnimada hore (PCEs), caruurtu waxay bartaan in bii'adoodu tahay mid ammaan ah oo sugan taasoo ay ku barbaari karaan. Xiriirku waa xiriirka dareenka ah ee carruurta xiliga hore kaasoo dhex mara carruurta iyo daryeel bixiyaha koowaad. Wuxuu muhiim u yahay korriinka wanaagsan ee shucuurta iyo bulshada iyo badqabka carruurta waxaana saameeya jawaabta, joogitaanka, ammaanka, iyo sugnaanta daryeel bixiyaha.

Waa maxay qaababka aad xiriirka kula dhisato carruurta barnaamijkaaga daryeelka carruurta kujirta?

- 
- 
- 
- 

## <u>U samaynta Hadafyada Barnaamijka Daryeelka Carruurta</u>

Isku keenista dhammaanba wixii aan maanta ka hadalnay, samaynta laba hadaf oo taageeraya korriinka shucuurta iyo bulshada ee carruurta kujirta barnaamikaaga xanaanada carruurta.

*Hadafka 1aad:*

*Hadafka 2aad:*

Wakhti ku bixi sidii aad u muujin lahayd sida hadafyadaanu u taageerayaan carruurta kujirta xananaadaada iyo saameynta ay ku yeelanayaan korriinkooda.

## Guudmarka Qaybta 2aad

**Knowledge and Competency Framework (KCF, Qaab-dhismeedka Aqoonta iyo Kartida) ee Minnesota ee Aagga Mowduuca Xirfadlayaasha Carruurnimada Hore, Aagga Maadada Child Development Associate (CDA, Isku Xirka Horumarinta Carruurta)**

Qaab-dhismeedka Aqoonta iyo Kartida (KCF) ee Minnesota ee Aagaga Mowduuca Xirfadlayaasha Carruurnimada Hore iyo Aagaga Maadada Isku Xirka Horumarinta Carruurta (CDA) waxay halkan ugu qoran yihiin si ay uga caawiyaan ka qaybgalayaasha inay fahmaan kartida, nuxurka, iyo maadooyinka looga hadlayo tababarka.

- Qaybta Nuxurka KCF: II. C. Sare u qaadista Korriinka Shucuurta iyo Bulshada
- Aagga Maadada CDA: III. Qaabbaka wanaagsan ee lagu taageeri karo korriinka shucuurta iyo bulshada carruurta.

**Ujeedooyinka Waxbarashada:**

Inta tababarkaanu socdo, ka qaybqaateyaashu waxay:

- Sharaxaan xirfadaha bulsheed iyo shucuureed ee lagama maarmaanka u ah inay carruurta ku guulaystaan waxbarashada iyo nolosha.
- Adeegsadaan istiraatiijiyadaha dhiirigalinaya habdhaqanka wanaagsan ee goobaha waxbarashada xiliga hore.

**Ujeedooyinka Waxbarashada** waa in dib loogu eegaa billoowga kulan kasta, oo lagu dadaalo in la isku xiro nuxurka iyo jawaabaha ka qaybqaataha dib loogu noqdo ujeedooyinka kulanka.

## Guudmarka Qaybta 2aad

| | Wakhtiga Qaybta | Fikradaha Muhiimka Ah | Xeeladaha Waxbaridda |
|---|---|---|---|
| **A** | 15 daqiiqo | Soo dhawow, hordhaca ujeedooyinka, qeexitaanada habdhaqanka dhibaatada leh | Hal Abuurka Kooxda Ballaaran |
| **B** | 15 daqiiqo | Abuurista Bii'o "Haa ah!" | Shaqada Gaarka ah |
| Lammaanin iyo Wax wadaagis | 20 daqiiqo | Xirfadaha Bulshada iyo kuwo Shucuurta ee Muhiimka ah | Dooda Kooxda Yar<br>Hal Abuurka Kooxda Ballaaran<br>Shaqada Gaarka ah |
| **D** | 40 daqiiqo | Istiraatiijiyadaha hagitaanka wanaagsan | Lammaanin iyo Wax wadaagis<br>Su'aalaha iyo Jawaabaha Kooxaha Ballaaran<br>Xaaladaha Kooxda Yar |
| **E** | 20 daqiiqo | Taageerada loogu talagalay ardayga | Shaqada Gaarka ah<br>Dooda Kooxda Ballaaran |
| **F** | 10 daqiiqo | Dib-u-eegista Ujeedooyinka/Soo Xirista | Dejinta Hadafka Shakhsiga |
| | Wadarta Guud ee Wakhtiga: 2 saacadood | | |

## Abuurista Bii'o "Wanaagsan!"

*U samee deegaan "Wanaagsan" adigoo hubinaya badqabka, korriinka dhaqanka ku habboon, iyo ka mid noqoshada dhaqameed ee dhammaan carruurta uu barnaamijku u adeego. Ayadoo caruurtu*

*dareemaan ammaan una fasaxan yihiin baarista, waxay u wadashaqeeyaan qaab xor ah, taasoo yaraynaysa niyad-xumada sidoo kalena dhimaysa baahida joogtada ah ee dhihista, "maya."*

Qor laba xeeladood oo aad ka hirgelin doonto goobta daryeelka ilmahaaga si aad ugu taageerto deegaanka "Haa!" ee carruurta.

*Istiraatiijiyadda 1:*

*Istiraatiijiyadda 2:*

**Taageerista xirfadaha howl fulinta sare**

Waxqabadyada da'da ku habboon ee waxtarka iyo madadaalada leh waxay carruurta ka caawiyaan inay xoojiyaan xirfadaha bulsho iyo shucuureed ee muhiimka ah.  Qorshee qaababka taageeraya horumarinta iyo xirfadaha howl fulinta sare ee xanaanadaada carruurta:

**Dhallaanka iyo socod-baradka yaryar (12-18 bilood)**

**Socod-baradka waaweyn iyo Laba**

**3 ilaa 5 sanno jirrada**

**Carruurta gaartay da'da dugsiga**

**Fa... qanka**

| Habdhaqamada Caqabadaha wata | Fahmidda habdhaqanka: Waa maxay wadahadalka caruurtu? | Istiraatiijiyadda Hagitaanka Habdhaqanka |
|---|---|---|
| 18-sanno jir ayaa ooyaysa oo ku dhagaysa waalidkeed subax walba marka la keeno. | | |
| 2-sanno jir aan si degen u fariisan karin marka Sheekada loo sheegayo. Wuu istaagaa wuuna iska tagaa si uu ugu cayaaro boombaleyaasha kale halka daryeel bixiyaha caruurtu u akhrinayo buugaagta kooxda. | | |
| 3-sanno jir ayaa qaniinaya oo ka dafaya boombaleyaasha waalidkiis marka uu rabo inuu ku cayaaro. | | |
| Marka kooxdu banaanka aado si ay ugu soo cayaaraan, 5-sanno jir ayaa kusoo celcelinaya inuu iskudayo korista dayrka ama wuxuu ku cararaa meelaha aan la ogolayn. | | |

| | | |
|---|---|---|
| | | |

## Sida uu iskugu xigo Hanaanka La falgalku

*Waxaa sameeyay saynisyahanka neerfaha Dr. Bruce Perry, qaabdhismeedkani wuxuu ka caawiyaa carruurta inay nidaamiyaan shucuurtooda oo ay bartaan inay fikiraan oo ay dib u milicsadaan.Waxaan ku dari karnaa "Soo Celinta" taxanahan si aan u caawino carruurta inay dib ula falgalaan kooxda ka dib xaalad adag.*

1. **Xakamaynta:** Marka koowaad, waa inaan nafteena xakameynaa. Haddii qofka weyn aysan xaaladiisu degenayn, kama caawin karaan carruurta in xaaladoodu noqoto mid degen. Joogso, qaado neef dheer, kana fakar waxa kuu muuqda. Ahoow qof dhug leh iskuna day inaad fahamto xaalada kahor inta aadan faragalin. Dabcan, haddii ilmuhu khatar ugu jiro waxyeello, waa inaad si degdeg ah u soo faragelisaa si aad u ilaaliso caafimaadka iyo badbaadada ilmaha.

   **Tan xigta,** ka caawi canuga inuu is xakameeyo. Diirada saar fiiro gaar ah oo ku aadan baahida degdega ah ee ilmaha ee badqabka jireed iyo shucuureed.Diyaari oo dhiirigali xirfadaha isdajinta sida neefta qotoda dheer, tirinta, ama adeegsiga goob lagu xasilo.Sii naxariis, sida inaad xabadka galiso haddii ilmuhu u baahanyahay, ama tartiib usoo dhawow ilmaha si uu u ogaado inaad u dhowdahay.

2. **Faham:** Marka canuggu soo degayo, iskuday inaad fahamto aadna awooda saarto dareenka canugga. Waxay u baahanyihiin in la daryeelo oo la dhegaysto. Tani waxay ka caawinaysaa inuu kugu xirnaado si aad uga caawiso inuu wax barto. Isticmaal jumladaha gaagaaban ee muujinaya inaad dhegaysanayso, sida, "waa caadi inaad dareento caro/murugo/niyad-xumaan" iyo "taasi waa mid laga xumaado/niyad-xumo/adag/ inay kugu dhacdo."

3. **Sababee:** Marka canugu soo dego oo wakhti kasoo wareego, kala hadal qaababka la isula xaliyo dhibaatooyinka. Kala hadal wuxuu qaab kale u samayn lahaa adigoo ilaalinaya xaduudaha iyo filitaanada. Kaalin ka cayaar helista xalka wanaagsan waxaadna bartaa qaababka looga hadlo shucuurta, rabitaanada, iyo baahiyaha.

4. **Soo celi:** Ka caawi inu cunugu dib usoo galo kooxda cayaarta dibna u hagaajiyo xiriirka, haddii ay muhiim noqoto. Ku dhiirigali in uu qaato mas'uuliyadda habdhaqankiisa adigoo ka caawinaya kusoo celinta bii'ada, u naxariisashada saaxiibka dhibaatadu soo gaartay, iyo kusoo laabashada jadwalka iyo u diyaargarowga in mar labaad wax la isla barto.

### Adeegsiga Iskuxigista La falgalista

1. **Xakamaynta:** Marka koowaad, isdaji. Kaddib, ka jawaab qaabkii aad canuga uga caawin lahyad in xaaladiisu degto. Waa maxay istiraatiijiyada aad isticmaali karto si ay kaaga caawiyaan xakameynta shucuurta (sida, neefta qotoda dheer, ka shaqaysiinta shanta dareen-wade - maxaad arki kartaa, urin kartaa, maqli kartaa, taaban kartaa? adigoo siinaya agabyada

dareemaha sida kubadda gacanta lagu tuujiyo ama boombaleyaasha cayaarta).

2. **Faham:** Sidee ayaad ilmaha ugu xirnaan kartaa ugana garaabi kartaa shucuurtiisa?
3. **Sababee:** Markii canugu dego, qaabkee ayaad canuga ugu hagi kartaa fahamka shucuurtaan iyo xalinta dhibaatooyinka mustaqbalka?
4. **Soo celi:** Sidee ayaad canugga uga caawin kartaa inuu si wanaagsan u galo kooxda cayaarta dhacdadaan?

## Ka jawaabista Waxyaabaha Kiciya Dabeecadda

| | | | |
|---|---|---|---|
| Qor tusaalooyinka dabeecadaha kicinaya shucuurtaada. | | | |
| Sidee ayay dabeeccadahaanu ku dareensiiyaan? Sidee dareentaa shucuur ahaan ama jir ahaan marka dabeecadahaanu yimaadaan? | | | |
| Sidee ayay dareenadaanu u saameeyaan jawaabahaaga dabeecadda canugga? | | | |
| | | | |

| | | | |
|---|---|---|---|
| Isdaji si aad degenaantaada ula wadaagto: Qor qaababka aad naftaada ku dejin karto inta ada kujirto xaaladaha adag. | | | |

## Ilaha

**Ilaha Xirfadeed:**

- Shuruucda Maamulka Minnesota, Cutubka 9502, Ruqsad-siinta Xarumaha Xannaanada ee Maalinti ah
- Qawaaniinta Minnesota Cutubka 142B. Carruurta, Dhalinyarada, iyo Shati siinta Carruurta
- Caring for Our Children: Xeerarka Howlaha Ccaafimaadka iyo Ammaanka ee QarankaCaring for Our Children: Heerarka Waxqabadka Caafimaadka iyo Badbaadada ee Qaranka
- Xeerka Anshaxa ee National Association for the Education of Young Children (NAEYC, Ururka Qaranka ee Waxbarashada Carruurta Yaryar) iyo Bayaanka Ballanqaadka
- Hagaha Luuqada Loo Dhan Yahay ee Ururka Cilmi-nafsiga Mareykanka

**Ilaha Hagida iyo Koriinta Carruurta**

- Eber ilaa Saddex
- National Center for Pyramid Model Innovations (NCPMI)
- Help Me Grow: Guulaha Koritaanka Shucuurta iyo Bulshada
- Xeerarka waxbarashada Xiliga hore ee Minnesota: Tilmaamayaasha Horumarka Carruurnimada Hore
- Center for Inclusive Child Care
- Hagaha Howlaha: Sare u qaadista iyo Ku dhaqanka Tababarka Xirfadaha Howl Fulinta ee Carruurta laga bilaabo dhalaanimada ilaa xiliga Qaangaarka

**Ereyada lasoo gaabiyay**

- NAEYC: National Association for the Education of Young Children (NAEYC, Ururka Qaranka ee Waxbarashada Carruurta Yaryar)
- ECIPS: Early Childhood Indicators of Progress (Tilmaamayaasha Horumarka Carruurnimada Hore)
- CSEFEL: Center on the Social and Emotional Foundations for Early Learning (CSEFEL, Xarunta Mu'asasooyinka Bulshada iyo Shucuurta ee Waxbarashada Xiliga hore)
- ACEs: Adverse childhood experiences (ACES, Waaya-aragnimada Xun ee Xiliga hore)
- PCEs: Positive Childhood Experiences (Khibradaha Wanaagsan ee Xiliga hore)

- CICC: Center for Inclusive Child Care (Xarunta daryeelka Carruurta ee Dhammaystiran)